

Taageerada kaaliye-shaqsiyeedka

Waxaad qof goobta shaqada ku sugan ka heli kartaataageeroiyo caawimaad, waa haddii aad leedahay awood-darrada shaqaysashada, taasoo itaaldarro u sabab ah. Kaaliyaha goobta shaqada dartiis waxaa loo shaqeeyaha la siinayaa magdhow. Ujeedada bixinta magdhowga laga leeyahay ayaa waxay tahay in shaqo aad hesho. Magdhowga wuxuu fududaynayaa in hab sahlan aad uga qaybgasho qorsheha ku salaysan siyaasadda suuqa shaqada ama dugsiga jihataynta suuqa shaqada. Taageerada waxaa loo yaqaanno *taageerada kaaliye-shaqsiyeedka*.

Kaalmo-dhaqaaleedka loo shaqeeyaha la siin doono waa immisa?

Gunnada ugu badnaantii waa 60 000 karoon sannadkii. Haddii ganacsade aad tahay oona itaaldarro leedahay, xaaladaas waxaa suurtagal noqon karto in kharashka gaadiidka awgiis ugu badnaantii la bixiyo 120 000 karoon sannadkii.

Illaa intee ayaa loo shaqeeyaha gunnada la siinayaa ?

Loo shaqeeyaha wuxuu gunnada qaadan karaa isla mudada aad adiga u baahan tahay.

Ma dartayda ayaa loo shaqeeyaha gunno loo siiyaa?

Loo shaqeeyaha waxaa la siin karaagunnada haddii adigu aad leedahay awood-darrada shaqaysashada, taasoo itaaldarro u sabab ah. Xitaa haddii ganacsade aad tahay ama qof iskiisa u shaqaysta oona leh itaaldarro waa la bixiyaa magdhowga.

Waxaan kaloo gunnada siin karna

- loo shaqeeyaha shaqaaleeya qof da'yar, oo itaaldarro awgeed lahayn awooda shaqaysashada, oo ka qaybgala jihataynta suuqa shaqada ama qorsheha ku salaysan siyaasadda suuqa shaqada
- dadyoow kale oo xilsaaran qabashada kaaliye-shaqsiyeed, tababarka jihataynta suuqa shaqada ama tababarka shaqada.

Sidee xilka loo qaybsaday?

Loo shaqeeyaha waa in laga hela caddayn u ku muujinaayo inaad kaaliye-shaqsiyeed u baahan tahay. Loo shaqeeyaha waa in caddaynta uu Xarunta Shaqada u keena. Markaas kaddib waxaan ku dhaqaaqaynaa baaritaan, kaasoo laga soo gabagabayso go'aanka heerka gunnada. Qoraalka go'aanka waxaa lagu soo qori doonaa lacagta loo shaqeeyaha isku-darkii la siin doono inta ay la eg tahay, iyo inta bil kasta la siin doono.

Intii aan go'aanka taageero kaaliye-shaqsiyeed adiga ku gaarka ah aan gaarin, waxaan wadatasho la yeelan doonaa ururrada shaqaalaha. Ku saabsan qofka adigoo kale ah oo ka qaybgala qorsheha ku salaysan siyaasadda suuqa shaqada.

Sidee gunnada loo bixiyaa?

Loo shaqeeyaha wuxuu codsan doonaa in 60 maalmood gudahooda gunnada bil kasta la siiyo, lagu siiyo foom u gaar ah ama internet, waa markii bisha shaqada ay dhamaato. Xarunta Shaqada waxay markaas kaddib bixinaysa lacagta bil kasta markii ay dhamaato. Marka hore ee gunnada la codsado waa in loo shaqeeyaha u soo dira koobiga qeexida mushaharka ee adiga ku gaarka ah.

Lacag go'aan ayaa bil kasta bixina. Haddii qofku bisha oo idil shaqayn, waxaa is-dhimayso lacagta gunnada hadba saacadaha shaqada. Loo shaqeeyaha ma codsan karo gunno haddii mudo laba bilood ka badan aad shaqada ka maqnaayd.

Nidaamyada

Xeer-maamuleedka (SFS 2000:630) ku saabsan waxkaqabadyada gaarka ah ee loogu talagalay dadyoowga qaarkood oo leh itaal darro iyo awooda shaqaysashada ee hooseeyso.

Xeer-maamuleedka (SFS 200:628) ku saabsan dhaqdhaqaaqa siyaasadda suuqa shaqada

Nagala soo xiriir 0771-416 416 haddii arrintaan aad xiisaynayso ama aad doonayso warbixin dheeraad ah. Waxaad kaloo booqan kartaa Xarunta shaqada kugu dhow ama shabakadda internetka arbetsformedlingen.se.